



Marwo Cheryl Watson-Harris, Kormeeraha guud

Marwo Vickie B. Turner, Guddoonka Guddiga  
 Mudane Dijon DaCosta, Guddoomiye Ku xigeenka  
 Marwo Anna Hill  
 Mudane Marshall D. Orson  
 Marwo Deirdre Pierce  
 Marwo Allyson Gevertz  
 Dhaqtar Joyce Morley

## LA TALINTA WARBAAHINTA

Nofeembar 5, 2021

## Xiriirka:

Portia Kirkland, 678-427-4898

Carla Parker, 404-734-1717

## DUGSIGA DEGMADA DEKALB OO KU DHAWAAQAYO TALLAABOYINKA XIGGO EE QORSHAHA MASTARKA DHAMEYSTIRAN E-SPLOST, MASHRUUCA IYO HORMARKA DUGSIGA LA SOO JEEDIYAY

STONE MOUNTAIN, Ga. – Saraakiisha Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb ayaa qabanayo shir jaraa'id Isniinta, Nof. 8 si ay ugu dhawaaqaan bixinta qorshaha mastarka dhameystiran ee tilmaamayo hormarinada dugsiga degmada oo dhan iyo kaabayaalka oo lagu maalgelinayo E-SPLOST dhawaan la ansixiyay (Canshuurta libinada Iqtiyaariga ee Ujeedada Waxbarashada Gaarka ah ee Deegaanka).

### GOORMA: Isniinta, Nof. 8, 2:45PM

**XAGEE: Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb, Dhismaha Maamulka iyo Waxbarashada. 1701 Mountain Industrial Blvd, Stone Mountain, GA 30083**

### AFHAYEENADA:

**Kormeeraha guud DCSD Cheryl Watson-Harris Guddiga Waxbarashada DeKalb  
 Guddoonka Guddiga Waxbarashada DeKalb Vickie Turner**

“Sida qeyb ka ah balanqaadkeena socdo ee daahfurnaanta iyo ka qeybgalka, waan sii wadeynaa inaan ku casuuno bulshada inay wax ka maqlaan wax ku saabsan mashaariicda badelida aan qorsheynay sida qeyb ka ah joogteynta maalgelinta E-SPLOST,” waxaa yiri Kormeeraha guud DeKalb Cheryl Watson-Harris.

### Ku saabsan E-SPLOST

Aftida E-SPLOST waxaa meelmariyay Nof. 2 codeeyayaasha Gobolka DeKalb oo codeyn boqolkiiba 81 ee ansixinta. E-SPLOST ayaa ku soo rogayo iibinada boqolkiiba hal oo ku isticmaalo canshuurta alaabaha iyo adeegyada lagu iibsanayo Gobolka DeKalb shanta sanno ee xigta. E-SPLOST-kaan ayaa ah sii joogteynta DCSD. Aruurinta maalgelinta E-SPLOST V ayaa ka bilaabaneyso Luuliyo 2017 illaa Juun 2022. Aruurinta E-SPLOST VI ayaa u jadwaleysan in laga qaado ka bilow Luuliyo 2022 illaa Juun 2027. DCSD ayaa ku qiyaastay in canshuurta ay soo xareyneysa \$660 milyan illaa \$700 milyan daqliga oo ay maalgeliso hormarinada dugsiga iyo mashaariicda kobcinta barnaamijka.

Mashaariicda E-SPLOST ayaa ku jiro dhisida Dugsi Sare ee Cross Keys; abuurida qeybta dugsiiga Sequoyah, oo ay ku jiraan dugsi dhexe ee cusub, dugsiiga sare, iyo meel u dhow dugsiiga hoose Dresden; dib ugu soo celinta Dugsiiga Sare McNair Manhaj Farsamo Shaqo; isugu dhafida dugsiyada hoose Dunaire iyo Allgood dugsi cusub ee leh xarunta waxbarashada hore iyo dib u dhisida Dugsiiga hoose Hawthorne.

Mashaariicda kale waxaa ku jiro ku badelida Dugsiiga Sare Avondale dhismo cusub iyo garoon noqonayo Machadka Farshaxanka Sameynayo; sameynta Machadka Tejnooliyada Intarneetka iyo Injineernimada iyo badelida Dugsiiga Sare Towers; dib u dhisida Dugsiiga Hoose Dresden; dib u dhisida Dugsiiga Hoose Stoneview; dib u dhisida Dugsiiga Hoose Jolly, abuurista K-8 ee Dugsiiga hoose Austin; xarumaha waxbarashada hore ee dheeraad ah; iyo hormarinada kaabayaalka tejnooliyada dheeraadka ah.

Wixii warbixin dheeraad ah, fadlan booqo [www.dekalbschoolsga.org/e-splost](http://www.dekalbschoolsga.org/e-splost).

###